miljöpartiet de gröna

# DABAYLO QABOW AYAA KA DHACAYA YURUB. WAA XILLIGII LA HELI LAHAA SIYAASAD DIIRRAN.

**Annaga oo ah Xisbiga** Caagaaran ee Iswidhin, ayaa waxaan rabnaa inaan noqono codka diirran ee ku jira Baarlamaanka Midowga Yurub. Waxaan lid ku nahay dabaylaha qabow ee jinsi-nacaybka leh ee Yurub oo idil ka dhacaya ee laga xidhayo xuduudaha dadka baahidu hayso. Markaan aragno weerarka lagu qaadayo isku-soo-baxyada Sharafta, iyo sida dadka raadinaya magangelyada iyo Roomada loola dhaqmo gudaha Yurub, ayaan annagu si xoog leh u dareenna inay Midowga Yurub u baahan tahay siyaasiyiin cagaar ah oo intii hore ka badan. Waxaan rabnaa inaan u hawlgalnoYurub furan oo naxariis leh, xuquuqda aadanaha si siman loogu wada dhowro – iyada oo aan loo eegin meesha aad ku nooshahay.

**Markay tahay** siyaasadda cimilada, Yurub waxa la soo gudboonaatay kala doorshada jidkii la qaadan lahaa oo muhiim ah. Xisbiyada muxaafadka ah ayaa raba in faraha laga qaado bar-tilmaameedyada cimilda ee himmadda weyn leh oo ay ka horreysiiyaan danaha shirkadaha waawayn kuwa mustaqbalka carruurteena. Annaga oo ah xisbiga cagaaran, kana soo horrjeedna arrintaas, ayaa rabnaa Inay Uuruka Yurub xilka isa saarto oo ay la dagallanto isbeddelka cimilada. Sidaa darteed, waxa loo baahan yahay in la helo xubno baarlamaan oo ka soo jeeda Xisbiga Cagaaran oo ku jira baarlamaanka Yurub! Midowga Yurub ayaa u noqon karta horseede ujeeddooyinka siyaasadeed ee cimilda, laakinse dhab ahaantii waxay ku xidhan tahay siyaasiyiinta aad u codeyso.

**Quwadda ka** dambeysa ee wadda Xisbiga Cagaaran ee Iswidhin ayaa ah dareenka xilkasnimo ee aan u qabno carruurteena iyo kuwa ay dhalaani inay hawo daray ah neefsan karaan, oo biyo nadiif ah cabbaan oo ay ku qubeystaan kuna koraan bilaa kiimikaallo khatar ah oo gala jidhkooda.

**Go'aammada Midowga Yurub** ayaa saamayn ku leh cuntada dul taal saxankaaga, bucshiradaha aad iibsato, xuquuqdaada markaad gasho internetka, fursadaha aad u leedahay socdaalka aad ku marto Yurub oo idil iyo wax intaa ka badanba. Waxaan rabnaa inay cuntadaadu xor ka ahaato sunta iyo inayna ka iman xayawaan si xun loola dhaqmay. Waxaan horreysiinaynaa doorbidka maalgashiga in lagu safaro tareenka caadiga ah halkii la maalgashan lahaa duulimaadka iyo jidadka gawaadhida. Waxaan rabnaa in qashinka caagga ah dib loo warshadeeyo, halkay u noqon lahaayeen qashin ku dambeeya badda. Waxaan maya leenahay jaajuuska dadka ee aan loo kala aabbe yeelin, oo aan haa leenahay adiga oo faraha ku haysan kara xogtaada shaqsi ee internetka.

**Midowga Yurub** waa inay xoogga saarto arrimaha sida dhabta ah inooga dhaxeeya – halista cimilada ka soo socota, dhibaatooyinka deegaanka ee aan xuduudaha lahayn iyo isu-taagidda xuquuqda aadanaha. Haddaan nahay Xisbiga Cagaaran ee Iswidhishka, waxaan muujinay inaan wax-ku-ool u leenahay siyaasadda Midowga Yurub. Iyada oo wadajir aan isku kaashannay muwaaddiniinta iyo dhaqdhaqaaqyada caanka ah, ayaan annaga iyo asxaabtayada cagaarka ah ee reer Yurub ku guulaysannay inaan beddelno jahada siyaasadda arrimaha kalluumaysigu u

jeedeen Midowga Yurub. Waxa kale oo aan horumar ku samaynnay ka-hortagga kiimikaallada halista ah, marar badana aan difaacnay xoriyadda qowlka iyo sharafta shaqsiyeed ee muwaad-dinka.

**Xisbiga Cagaaran** ee Iswidhishka ayaa ka soo horjeeda sida loo dhisay iyo siday u shaqayso Midowga Yurub. Sidaa darteed ayaan hawasha ugu jirnaa sidii aan u beddeli lahayn Midowga Yurub. Waxaan rabnaa inaan si ka sii fican sidii hore aan ula soconno nidaamka hab-go'aam-inta Midowga Yurub oo aan u halganno mabda'a inay dadweynahu marin u helaan diiwaanka rasmiga ah ee hay'adaha Midowga Yurub.

**Waxa kale oo aan** aamminsannahay inay habboon tahay in go'aanka ay gaadhaan kuwa ugu dhow ee ay saamayso arrintu sida ugu suurtagalka badan. Arrimo badan oo ay Midowga Yurub go'aan ka gaadho ayaa si ka fiican loogu gaadhi karaa go'aanka heer qaran, gobol ama degmo ahaan. Baarlamaannada dalalka xubnaha ah ayaa u baahan inay helaan fursado ka badan sidii ay u xaddidi lahaayeen inayna Midowga Yurub gaadhin go'aanno ayna u mudnayn.

**Waxaan rabnaa** in aan u hawlgalno Midow Yurub oo u dabacsan iskaashiga, halkaas oo dal kastaa gaar ahaantiis u dooran karo, illaa heer macquul ah, qaybaha ay rabaan inay ka qayb qaataan. Xisbiga Cagaaran ee Iswidhishka ayaan rabin inay Midowga Yurub isku beddesho Yurub federaal ah. Laakiin waan rabnaa in dal kasta oo qanciya shuruudaha aasaasiga ee dimo-qraadiyadda iyo xuquuqda aadanahu inay xaq u yeeshaan inay ku soo biiraan Midowga Yurub.

# MUSHARRAXIINTAYADA:

## Isabella Lövin

“Badda iyo hawadu soohidnno ma leh. Haddii ay tahay inaan wax ka qabano caqabadaha ugu waawayn ee adduunka ka jira ee ku lug leh cimilada iyo bey'ada badda, Midowga Yurub ayaa markaa ah golaha ugu wanaagsan ee midho dhalin kara. Shir weynaha xiga ee cimilada ee lagu qaban doono Baariis 2015 ayaa fursad adduunka u ah. Quwad kale oo weyni ma noqon karto horseed, markaa waxaan rabnaa inaan hubino inay Midowga Yurub hoggaanka qabto.
”Waxa kale oo aan rabaa inaan ku sii wado u shaqaynta bey'adda badda ee oo ka sii wanaagsan. Xad-dhaafinta kalluumaysiga, aashataynta badda, xad-dhaafinta nafaqaynta carrada, qaacinta kiimikaallada iyo qashinka iyo ilaalinta gobollada Arkitigga ayaa ah arrimo in wax in laga qabto labadaba Midowga Yurub iyo heer caalamiba. Taasi weeye waxa aan rabo inaan u hawlgalo. Waxaan ogahay inuu baarlamaanka Midowga Yurub wax-ku-ool yeelan karo, markaa cod bixin-taada ayaa muhiim ah!”

## Peter Eriksson

”Dimoqraadiyadda iyo furnaanta ayaa ah jidka la marayo. Maantana, derbiyada loo sameystay-dunida nagu wareegsan ayaa kor u sii dheeraanaya. Dad sii badanaya ayaa xitaa su'aalaya xaqa dadku u leeyihiin inay si xor leh u kala socdaan dalalka Midowga Yurub. Waxay noqon doontaa tallaabo dib-u-socod hadday taasi dhab noqoto.”
“Midowga Yurub ayaa sidoo kale dejin kara shuruudo ka adag kuwa jira oo u yeelan kara xeerar dalalku gaar ahaantooda ku yareeyaan musuqa iyo kala-takoorka. Jidkaas iyada oo loo maro doorashada Baarlamaanka Yurub, ayaad haddba gacan ka geysan kartaa sidii loo abuuri lahaa bulshooyin macquul ah oo oo u shaqaynaya qaaraddeena.

Waxaad hadda haysataa fursad aad codkaaga u isticmaasho sidaad Yurub waxoogaa aad uga sii fiicanayn lahayd. **Beddel Yurub, u coodee Cagaarka.**